

## PARKS & GREEN SPACES LEVY Shuruudaha Mashruuca Sanduuqa Fursaddaha

Wareega hore ee maalgalinta \$ 7 milyan ayaa diyaar u ah mashaariicda Yeelashadda iyo Horumarinta ee lagu qiimayay shuruudahan iyaddoo la marayo hab xulasho.

**Waraqda soo-jeedinta Mashruucu waxay ku eg tahay**  
**Febraayo 1, 2010**  
**Codsiga Mashruuca wuxuu ku eg yahay Abriil 2, 2010**

*Guddida Guud ee Muwaadiniinta ee Parks & Green Spaces Levy waxay ku dadaali doontaa qaybinta lacagta sanduuqa oo cadaalad ku dhisan. Waxaa maalgalintooda la tixgelin doonaa kaliya mashaariicda keenaya yeelashadda meel ama dhamaystika mashruuca horumarineed.*

### Shuruudaha Mashruuca

1. Mashaariicda horumarintu waa inay ku yaaliin meel dadwaynuhu gaadhi karo.
2. Mashruuca xajmigiisu waa inuu noqdaa mid filnaansho leh oo ay ka soo bixi karaan beero dadwayne, meel ciyaareed ama meel banaan oo la taaban karo. Mashaariicda horumarinta, abaalmarinta mashruucu waxay u dhaxaysaa \$200,000 ilaa \$750,000. Mashaariicda yeelashadda, abaalmarintu waa ilaa \$1,500,000 waana inay ugu yaraan xajmigoodu noqdaan 10,000 sq. ft.(qiyaastii)

### Shuruudaha hore

*Guud ahaan, waxaa mudnaan la siin doonaa mashaariicda si fiican u buuxiya shuruudaha hore.*

3. Mashruucu inuu soo maray gorfayn dawladeed ama uu waafaqsan yahay qorshe la ansixiyay, sida: qorshaha xaafadda, qorshe hadh biyood, qorshe maamul khudaar, ama qorshe wayne Beer dadwayne.

*Mashruucu waa in aanu ku keenin Magaaladda kharash dayactir iyo hawleed oo aad u sareeya. (qodabkani ma khuseeyo mashaariicda yeelashadda).*

4. Mashruuca waa in ay ka muuqataa in si wayn xaafaddu ugu lug leedahay oo u taageerayso, ama waa inuu ka turjumayaa baahi muuqata.

### Shuruudaha Qiimaynta

*Waxaa soo raaca shuruudaha hore, in mashaariicda loo tixi doono sida ay ugu kala horeeyaan Shuruudahan Qiimaynta ee soo socda.*

6. Miyuu mashruucu muujinayaa habab hal-abuurnimo leh oo cusub oo uu ku buuxinayo baahiyaha bulsho ee dhinacyadda beeraha dadwaynaha, meelaha cagaaran iyo imkaaniyaadka cagaaran? (20 dhibcood)
7. Mashruucu ma waxa weeyi fursad sooc ah oo la waayi doono haddii aan talaabo la qaadin imika? (20 dhibcood)
8. Mashruucu miyuu ka hadlayaa gol-daloolo beer dadwayne, meel ciyaareed ama meel banana (sida lagu xusay Beeraha Dadwaynaha 2006 ee lafa-gurka meelaha banana), ama bulsho aan si fiican loogu adeegin? (20 dhibcood)
9. Mashruucu ma ka qabsoomayaa meel koraysa, gaar ahaan fagaare tuulo ama fagaare magaalo? Waxaa mudnaan la siin doonaa mashaariicda ku yaala xuduuda tuulo magaaloobaysa oo aan lahayn meel banana. (15 dhibcood)
10. Mashruucu miyuu xalinayaa caqabad wayn oo soo waajahaysa bulshadeena, sida is badalka cimiladda, caafimaadka biyahay, ama maamulida korniinka? (15 dhibcood)
11. Mashruuca miyaa lagu kabayaa khayraad kale oo ay bixinayaan hay'addo dawli ah, ama maalgalin dadwayne, ama hay'add samafal oo gaar loo leeyahay? (10 dhibcood)